


# NABADSHE

(Maansada Nabadaynta Iyo Milicsi Suugaaneed)



Waa buug cusub oo ka hadlaya *Nabadaynta*, waxanu ka kooban yahay laba boqol iyo laba iyo toddobaatan bog, waxaana qoray hal-abuurka da'ada yar ee Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan). Waxa buuggan **Nabadshe** laga qoray hal-abuurka gabyaaga ah ee isna dhallinyarada ah ee Yuusuf Cismaan Cabdille (Shaacir), waxana ku qoran oo buuggu koobayaa suugaan ku saabsan nabadaynta iyo soo af jaridda colaadihii sokeeyee ee Gobolka Togdheer. Waxa **Nabadshe** ku jira oo laga helayaa in ka badan labaan gabay oo ka falloonaya doorka iyo qiimaha nabadaynta, duug reebka dhaqanka iyo hiddaha soomaalida, waxyeellada iyo hadimooyinka Qaadka iyo ibtilada hayb

sooca iyo quudhsiga oo dhammaan uu hal-abuuray abwaan Yuusuf-Shaacir. Waxa kale oo **Nabadshe** loogu tegayaa daraasayn ama cilmi baadhis isla abwaanku ku sameeyey laamaha suugaanta soomaalidu u kala baxdo, iyo magacyada tirsiga bilaha iyo maalmaha soomaalida.



Buuggan **Nabadshe** farriinta uu soo gudbinayaa waa tilmaan iyo tusmo, guud ahaan hiil u ah samaanta iyo la jirkeeda, gaar ahaanna nabadda iyo u taagnaanteed. Abwaanka buuggan laga qoray Yuusuf Cismaan Cabdille (Shaacir), isaga oo aan da' weynayn ayuu ku guuleystey inuu suugaan nabad doon ah ku dhex galo, kuna qaboojiyo, maansadiisuna isu soo jiiddo dadkii walaalaha ahaa ee ay kala fogaysey hurgumada iyo xajiinta colaadda sokeeye ee dalka ka dhacday horraantii sagaashameeyadii, siiba tii gobolka Togdheer. **Nabadshe** iyo

**baaqiisa nabadeed** waxa ay hoosta ka xarriiqayaan baahida joogtaysan iyo diihaalka maanta uu qof kasta oo soomaali ahi u qabo **Nabadayn** iyo **Nabad**, waana tuse fiican oo gacan qabsi u noqon kara qof kasta oo jecel nabadda iyo ku wada noolaanshaheeda, dareemina kara waxtarka iyo qiimaha in raad goob loo wada galo, lana badhi taaro hawlaha geeddi socodka nabadaynta ee dadka soomaalida.

Marka laga yimaaddo farriinta nabadeed ee buuggan **Nabadshe**, waxa kale oo laga helayaa dheegag qoraallo ah, xambaarsanna xog iyo xigmad ka soo jeedda wacaasha hiddaha iyo dhaqanka soo jireenkii hore ee soomaalida, sida magacyadii hore ee bilaha iyo maalmaha, iyo qayb abwaanku ku falanqaynayo laamaha ay suugaanta soomaalidu u kala baxdo. **Nabadshe** waa buugga nabadaynta, dhaqanka iyo hiddaha, afka iyo suugaanta soomaalida, waxana ka faa'iidaysan kara, guud ahaan bulshada oo dhan yar iyo weyn; rag iyo dumarba, gaar ahaanna waxa ka sii dab qaadan kara dadka ku hawlan dedaalka nabadaynta iyo jilib salaaxa ku salaysan, kana dhex wada dan iyo deris-wadaagta colaadaha sokeeye kala geeyeen, aafooyinkii dagaalladuna weli ka dhex hulaaqayaan.



Qoraaga buuggan **Nabadshe** Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan) waxa uu ka mid yahay hal-abuurka da'da yar ee ku xadfan ama ku mashquulsan horumarinta xirfaddooda far-shaxannimo iyo qoraanimo. Suldaan waa hal-abuur leh hibada curinta maansada, waa qoraa cusub oo u hawl gala raadinta, ururinta, kaydinta, kobcinta, ilaalinta iyo fidinta dhaqanka iyo hiddaha, afka iyo suugaanta soomaalida, waa ninka dhaqan geliyey, agaasimana Rugta Kaydinta Dhaqanka, Afka iyo

Suugaanta ee [www.aftahan.com](http://www.aftahan.com) oo ay ku kaydsan yihiin suugaan iyo xog taariikheed muhiim ah. Buuggiisan **Nabadshe** oo ah kii koowaad ee uu soo saaro, waxa uu qarxirayaa hibada qoraaga ku aasan, waana buug dhaxal gal ah oo ku soo biiray saaxadda ereyga qoran. Maanta ayuu horyaallaa **Nabadshe** dhaayaha inta u haliisha ama hamuunta u leh ee qadderisa ereyga qoran (wax akhriska) iyo inta kale ee qiimaysa falanqaynta, faallaynta, kala dhilidda iyo kulaminta afkaaraha iyo aaraada kala duwanaan karta dar-wadaajinteeda ama dood-wadaajinteeda.

Wixii faahfaahin ah ee la xidhiidha buuggan iyo meelaha laga heli karo, waxaad kala xiriiri kartaan Emailkan: [baashe@aftahan.com](mailto:baashe@aftahan.com)

Allaa mahad leh

Maxamed Baashe Xaaji Xasan  
[baashe@aftahan.com](mailto:baashe@aftahan.com)

Faafin: [www.SomaliTalk.com](http://www.SomaliTalk.com) | May 2005